Somaliska

**MAAMULKA ILMAHA IYO WAXBARASHADA**

05/09/2019

# DENACODE NUDDIS

## Buug yaraha Koriyayaasha

## Waa maxay Nuddis?



Nuddis waa nidaam dhigitaal ah oo loogu talo galay waxbarashada dugsiga kahor ee Maamulka Magaalada Bollnäs. Ujeedada nidaamka xaadiriska dhigitaalka ahi waa inuu fududeeyo oo uu xaqiijiyo qorista iyo ka qayb galka caruurta.

Nuddis waxay shaqaalaha ka helaan macluumaadka fududeeya qorshaynta hawsha. Macluumaadka cad ee xaadiriska ee caruurta, wakhtiga imaatinka iyo ka tegida, tirada caruurta wax ku cunaya waxbarashada dugsiga kahor, iwm. ayaa laga geli karaa. Si loo qorsheeyo hawlaha si waxtar leh sida suuragal ah, shaqaalagu waxay u baahan yihiin inay helaan jadwalka ilmahaaga wakhti fiican.

Nuddis waa app taleefanka ah (iPhone iyo Android) waxaana sidoo kale lagu isticmaali karaa iPads. Isbadala aad samayso koriyaha sharciga ah ahaan waxaa ay toos u geli doonaa si ay shaqaalaha waxbarashada dugsiga kahor ay u heli karaan macluumaadkaas. Booqashada nidaamka waa la inkiribti gareeyay oo waxay leeyihiin amni aad u sareeya. Nuddis waxa loogu talo galay inay fududaato, oo si fudud loo isticmaali karo. Buugan waxa uu ku siinayaa guudmarka shaqada nidaamka iyo sida aad u bilaabi karto Nuddis.

## Bilawda iyo dhamaadka maalinta

Inaad ilmahaaga kuk duwaan geliso marka uu yimaado iyo marka aad ka kaxaynayso kaas oo ay sameeyaa shaqaalaha Nuddis iyada oo adeegsanaya iPad oo "taabanaya" sawirka ilmahaaga si ay u geliyaan/uga saaraan. Gelitaanka/ka saarida taabashadu sawirka waxaa samaynaya adiga iyo ilmahaaga ilaa inta shaqaaluhu la joogaan, kuwaas oo sidoo kale ka masuul ah samaynta duwaanka.

## Macluumaadka muhiimka ah ee Nuddis

Macluumaadka ku saabsan ilmahaaga iyo koriyaha waxay si toos ah u gelayaan duwaanka ardayga ee *Skolplatsen* oo ay maamusho Dawlada Hoose. Markaa Nuddis waxaa ku jira macluumaadkaaga, waa inaad gelisaa macluumaadkaaga *Skolplatsen* laftaadu. Waxaad sidoo kale sii wadi kartaa inaad ka jawaabto si aad u xaqiijiso in macluumaadka uu yahay macluumaadkii ugu danbeeyay. Waxaad ka geli kartaa Skolplatsen URL: https://bollnas.skolplatsen.se.

Macluumaadka muhiimka ah, ee gaarka ah, sida xasaasiyada, waxaa ay shaqaaluhu gelin doonaan Nuddis iyada oo lagala tashanayo koriyaha.

## App-ka Nuddis

Waxaad isticmaali kartaa app-ka Nuddis si aad u geliso ilmahaaga jadwalka maalintaa oo aad u dirto macluumaadka u muhiim ah shaqaalaha si ay u ogaadaan maalintaas.

App iOS (iPhone ama iPad) ayaa sidoo kale laga heli karaa App Store. App-ka waxaa lagu heli karaa Android kaas oo laga heleyo Google Play.

## Gelitaanka

Koriye ahaan, waa inaad gashaa app-ka Nuddis adiga oo isticmaalaya BankID oo waxaad markaa awoodaa inaad kaliya aragto macluumaadka ilmahaaga. Marka lagaa dalbado inaad sheegto magaca xisaabtaada inta aad ku jirto, waxaad gelin doontaa: **bollnas.** Hadii aanad lahayn ikhtiyaarka isticmaalka BankID, waxaad heli kartaa caawimo adiga oo la xidhiidhaya shaqalaaha waxbarashada dugsiga kahor.

## Isticmaal Nuddis adiga oo ka galaya iPhone/iPad

Hadii aad isticmaasho app-ka Android, waxaad qabataa qaybta xigta.


Marka aad gasho app-yada iOS koriya ayaan, waxaad arki doontaa shan daaqadood: *Jadwalka, Guudmarka, Taariikhda, Macluumaadkayga* iyo *Caawimo*.

JADWALKA
Guudmar hore oo macluumaadka ilmahaaga ah ayaa lasoo dhigi doonaa halkan. Dooro ilme si aad u aragto ama u badasho jadwalkiisa.




Si aad ugu darto jadwadlka, waxaad riixdaa maalinta munaasabka ah ee taariikhda oo waxaad buuxisaa wakhtiga la keenayao iyo la qaadayo, cida keeneyso ee qaadaysa oo waxaad ku soo dhamaystirtaa adiga oo riixaya badhanka "Create".

Hadii aad doonayso inaad isla markaa isticmaasho dhawr maalmood, waxaad riixdaa badhanka “Copy”. Dooro maalinta kowaad ee aad doonayso si aad <u>nuqul uga samaysato</u> oo aad markaa kadibna maalinta aan doonayso inaad <u>nuqulka u samayso</u> oo waxaad riixdaa badhanka "Next". Hadii aad leedahay dhawr caruur ah, waxaad markaa nuqul ku samayn kartaa isla markaa caruurta kale. Riix badhanka "Next" mar kale oo waxaad markaa iminka nuqul ka samaysay hal maalin oo waxaad u samaysay maalmo kale.




Waxaad nuqul ka samayn kartaa dhawr jeer todobaadka dhan oo xidhiidhsan oo isla maskaa ah. Riix badhanka “Copy” oo waxaad doortaa “Whole week”. Talaabadan, waxaad dooran kartaa todobaadka aad doonayso inaad nuqul ka samayso markaas, sidoo kale waxa aad doonayso inaad u dhaxaysiiso.

**Warbixinta Maqnaanshaha**

Hadii ilmahaagu maqan yahay waxay doonto ha noqotee sababtu maalin dhan oo xanuun ama maqnaansho ah, waxaa loo baahan yahay inaad ka warbixiso isbadalkaas sida ugu dhakhsaha badan si shaqaaluhu ay u qorshayn karaan hawsha.

Warbixinta macqnaanshaha waxaa lagu sameeyaa iyada oo la riixayo jadwalka maalintaas oo la dooranayo "leave" (tegitaan) ama "Absent/Sick" (maqnaansho/xanuun) badhanka ah oo markaa waxaad riixdaa dhamaadkana badhanka "Change".




Isbadalkaaga toos ayuu u geli doonaa app-ka Nuddis wakhtiga waxbarashada dugsiga kahor laakiin shaqaalahaaga waxbarashad dugsiga kahor u gee si ay u hayaan macluumaadka hadii ay dhacdo in aad maqan tahay. Warbixinta maqnaanshaha/xanuunka ama warbixinta maqnaanshaha waxaa loogu baahan yahay in lagu

Maalmaha hore loo qorsheeyay, waxaad ka tagi karaa fariin uu la socdo macluumaadka muhiimka ah si ay shaqaaluhu u ogaadaan. Waxaad ka geli kartaa macluumaadka qaybta, "Daily info for staff" (macluumaadka maalin kasta ee shaqaalaha). Tusaale macluumaadka muhiim ah waa hadii ilmahaagu uu maqan yahay maadaama oo uu calooshu xanuunayso.

QORAAL! Ujeedada uruurinta macluumaadka kaliya waxa uu ku xadidan yahay faafitaanka caabuqa ee caruurta waxbarashada dugsiga kahor ku jirta. Halkan, waxaad sidoo kagala hadli kartaa shaqaalaha sida ay doonayaan in macluumaadka loo maamulo.

GUUDMAR

Halkan waxaad ka arkaysaa macluumaadka kooban ee jadwalka ilmahaaga ee dhawrka maalmood ee xiga.

TAARIIKHDA

Halkan waxaad ku arkaysaa tirakoobka sida aad u keentay ama aad u qaaday dhawrkii todobaad ee lasoo dhaafay marka loo eego jadwalkaaga qorshaysan.

MACLUUMAADKAYGA


Halkan waxaad ka eegi kartaa macluumaadkaaga xidhiidhka ee Nuddis ku jiraa inuu sax yahay. Macluumaadkan ayaa maqan, waxaad gashaa Skolplatsen oo waxaad gelisaa macluumaadka halkan. Nuddis waxay markaa wax ka badali doontaa macluumaadka si toos ah isla markaa.

## Isticmaal Nuddis oo ku isticmaalka app-ka Android

App-ka Android waxa uu leeyahay daawadaha soo socda: *Jadwalka* iyo *Macluumaadka.*

JADWALKA

Guudmar hore oo macluumaadka ilmahaaga ah ayaa lasoo dhigi doonaa halkan. Dooro ilme si aad u aragto ama u badasho jadwalkiisa.




Waxaad ku dartaa jadwalka, waxaad riixdaa maalinta la xidhiidha ee taariikhda oo waxaad buuxisaa wakhtiga la keenayao iyo la qaadayo, cida keeneysa iyo qaadaysoa oo waxaad riixdaa badhanka "Ku Dar/Badalka".

Waxaad nuqul ka samayn kartaa todobaadka dhan dhawr jeer oo xidhiidhsan. Riix khadka dameeriga madaw ah si aad u muujiso tirada todobaadka, sida todobaad 37 ee sawirka tusaalaha ah oo waxaad riixdaa todobaadyada aad doonayso wakhti kadib iyo hadii ay khusayso wax ka badan hal ilmo.

**Warbixinta Maqnaanshah**

Hadii ilmahaagu maqan yahay waxay doonto ha noqotee sababtu maalin dhan oo xanuun ama maqnaansho ah, waxaa loo baahan yahay inaad ka warbixiso isbadalkaas sida ugu dhakhsaha badan si shaqaaluhu ay u qorshayn karaan hawsha.

Warbixinta macqnaanshaha waxaa lagu sameeyaa iyada oo la riixayo jadwalka maalintaas oo la dooranayo "leave" (tegitaan) ama "Absent/Sick" (maqnaansho/xanuun) badhanka ah oo markaa waxaad riixdaa dhamaadkana badhanka "Change".

Isbadalkaaga toos ayuu u geli doonaa app-ka Nuddis wakhtiga waxbarashada dugsiga kahor laakiin shaqaalahaaga waxbarashad dugsiga kahor u gee si ay u hayaan macluumaadka hadii ay dhacdo in aad maqan tahay. Warbixinta maqnaanshaha/xanuunka ama warbixinta maqnaanshaha waxaa loogu baahan yahay in lagu sameeyo maalmaha hore loo qorsheeyay.

Dhawr maalmood ayaa hore u qorshaysay, waxaanad u dhaafi kartaa fariimo kooban oo macluumaadka ah taas oo muujinaysa inay muhiim tahay in shaqaaluhu inay ogaadaan. Tan waxaa lagu sameeyaa qaybta "Comments" (faalooyinka). Tusaale ahaan macluumaadka muhiimka ah waa in ilmuhu u maqnaanayo maadaama oo hargab caloosha ahi uu ku dhacay.

QORAAL! Ujeedada uruurinta macluumaadka kaliya waxa uu ku xadidan yahay faafitaanka caabuqa ee caruurta waxbarashada dugsiga kahor ku jirta. Halkan, waxaad sidoo kagala hadli kartaa shaqaalaha sida ay doonayaan in macluumaadka loo maamulo.

MACLUUMAAD
Waxaa jira macluumaad kooban oo ku saabsan helitaanka Nuddis ee halkan, sidoo kale ikhtiyaarka in la bakhtiyo/shido wargelinta oo aad ka baxdo.

## Su'aalaha Badanaa La Is Waydiiyo

**Sidee ayaan ugu dari karaa ikhtiyaarka hadii aanan lahayn ikhtiyaarka inaad heli karo BankID?**
Hadii aanad lahayn ikhtiyaarka inaad heli karto Bank ID, waxaad kala hadashaa shaqaalaha waxbarashada dugsiga kahor kuwaas oo kuu sheegi doona waxa ay tahay inaad samayso.

**Maxaan ugu dari/badali kari waayay jadwalada labada maalmood ee soo socda?**
Si aad u qorshayso hawlaha, waxbarashada dugsiga kahor waxay u baahan tahay inay ogaato wixii isbadalo ah ee jadwalkaaga ugu yaraan 2 maalmood kahor. Hadii aad u baahan tahay inaad badasho jadwalka wax ka yar laba maalmood oo wargelin ah, waxaad la xidhiidhaa shaqaalaha waxbarashada dugsiga kahor.

**Sidee ayaan fariin ugu diraa shaqaalaha?**
Fariimo gaaban ayaa loogaga tagi karaa app-ka. Waxaad gelisaa faalooyinka qaybta, “Daily info for staff” ee (iOS) ama “Comments” (Android). Fariimaha waxaa ay usoo dhigmayaan shaqaalaha waxbarashada dugsiga kahor iyada oo hadal ah oo ku xiga sawirka ilmaha ee app-ka Nuddis.

**Maka warbixin karaa maqnaanshaha/xanuunka aniga oo isticmaalaya app-ka ilmahayga?**
Haa, taasi waa macquul. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad kasoo warbixiso wixii maqnaansho ah sida ugu dhakhsaha badan si shaqaaluhu u qorshayn karaan hawlaha. Dooro “Leave” ama “Absence/Sick” oo riix “Change”.

**Maxaan samaynayaa hadii aan iloobo inaan geliyo/ka saari ilmahayga?**

Waxaad la xidhiidhaa shaqaalaha si ay kaaga caawiyaan.

**Maxaa la iigu soo dirayaa iimeelada ku saabsan wakhtiyada maqan ee ilmahayga?**
Nidaamka ayaa cinwaankaaga iimeelka kuugu soo diri doonaa xasuusin. Todoba maalmood kahor wakhtigii ugu danbeeyay ee aad jadwalka qabsatay, nidaamku waxa uu kuusoo diri doonaa xasuusin in la gaadhay wakhtigii aad gelin lahayd jadwalka cusub. Hadii aanad doonaynin in laguusoo diro xasuusino, sida, wixii fasaxyada ah, ilmahaaga waxaa lagu calaamadin doonaa inuu maqan yahay jadwalka.

**Mudo intaa le'eg ayuu macluumaadka ilmahaygu ku jiri doonaa Nuddis?**
Macluumaadka ku saabsan ilmahaagu waxa uu ku jiri doonaa 3 sano. Mudadaa kadib, macluumaadkaaga waxaa laga saari doonaa wixii haybta sheegaya waxaana loo adeegsan doonaa wixii ujeedo ah tirakoobka.

# Macluumaadka Xidhiidhka Xafiiska Waxbarashada

Wixii taageero ah waxaad u dirtaa: support.utbildningskontoret@bollnas.se  Waxaad si cad u sharaxdaa waxa ay tahay mushkiladu, waxa aad samayn karto marka ay wax khaldamaan, nooca monilka ama taableetka aad isticmaalayso iyo hadii uu hore u shaqaynayay.